

# Waxaad xaq u leedahay inaad hesho "Qiyaasta Daacada ah" oo sharxaysa cadadka qarashka uu daryeelkaaga caafimaadku ku kacaayo

Sida ku cad sharciga, dhakhaatiirta ayaa laga doonayaa inay siiyaan bukaannada aan haysan noocyada gaarka ah ee caymiska caafimaadka ama aan adeegsan noocyada gaarka ah ee caymiska qiyaasta qarashka agabka iyo adeegyada caafimaadka kahor inta aan agabkaan ama adeegyadaan la siin.

- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho Qiyaasta Daacada ah ee wadarta guud ee qarashka la filaayo ee ku baxaaya agab kasta ama adeegyo kasta oo daryeelka caafimaadka ah marka la codsado ama marka waqti loo qabto agabka ama adeegyada noocaas ah. Tan waxaa ku jira qarashaadka la xariira baaritaannada caafimaadka, daawooyinka lagu qoro, iyo qarashaadka isbitaalka.
- Haddii aad waqti qabsato agab ama adeegga daryeelka caafimaadka ugu yaraan maalmaha shaqada sadex maalmood kahor, iska xaqiiji in dhakhtarkaaga ama xaruntaada caafimaadka ay ku siiso Qiyaasta Daacada ah oo qoraal ah hal maalin oo malmamaha shaqada ah gudahed kadib marka la waqtiyeeyo. Haddii aad waqtiyaysato agab ama adeegga daryeelka caafimaadka ugu yaraan 10 maalmood oo maalmaha shaqada kahor, xaqiiji in dhakhtarkaaga ama xaruntaada caafimaadka ay ku siiso Qiyaasta Daacada ah oo qoraal ah Sadex maalin gudahood oo maalmaha shaqada ah kadib marka la waqtiyeeyo. Waxaad sidoo kale waydiisan kartaa dhakhtar kasta ama xarun kasta oo caafimaad Qiyaasta Daacada ah kahor intaadan waqtiyaysan agabka ama adeegga. Haddii aad sidaas samayso, xaqiiji in dhakhtarkaaga ama xarunta caafimaadka ay ku siiso Qiyaasta Daacada ah oo qoraal ah sadex maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood kadib marka aad codsato.
- Haddii aad ka hesho bixiye kasta ama xarun qarash ugu yaraan \$400 ka badan Qiyaastaada Daacada ah ee aad horay uga heshay bixiyahaas ama xaruntaas, waad ka doodi kartaa qarashka.
- Xaqiiji inaad ka reebato nuqul(cadeyn) ama sawirka Qiyaastaada Daacada ah iyo biilka.

Wixii su'aalo ama xog dheeri ah oo ku saabsan xaqa aad u leedahay Qiyaasta Daacada ah, booqo [cms.gov/nosurprises/consumers](https://www.cms.gov/nosurprises/consumers), iimeel udir [FederalPPDRQuestions@cms.hhs.gov](mailto:FederalPPDRQuestions@cms.hhs.gov), ama wac **800.985.3059**.

Si aad u hesho liiska buuxa, fadlan ka codso buuga tilmaamaha dhakhtarkaaga ama booqo [corewellhealth.org/policies](https://www.corewellhealth.org/policies)

